WAXAA WAAJIB AY IN DUKUMEENTIGAN LUUQADDADA LAGU DIYAARIYO

OGGOLAANSHAHA FOOMKA GAABAN

Oggolaanshaha Ka-qaybqaadashadha Cilmibaadhis – Foomka Gaaban

Hordhac

Waxaanu kaa codsanaynaa in aad cilmibaadhis ka-qaybqaadatid. Cilmibaadhistu waa hab fikradaha cusub lagu tijaabiyo. Cilmibaadhistu waxay naga caawisaa in aynu baranno habab cusub oo aynu carruurta ku xannanayn karno.

Ka-qaybqaadashada cimlmi-baadhistu waa mid ikhtiyaarkaaga ku-salaysan.Waad oggolaan kartaa ama waad iska-diidi karta. Go'aan-kasta oo aad gaadhid waanu SOO-DHAWAYNAYNAA. Go'aan-kasta oo aad gaadhid kaama joojinayo xannaanada fiican ee aynu ku siinayno.

Dadka cilmibaadhista fuliya waxaa la-yidhaahdaa cilmibaadhayaal. Cilmibaadhayaasha ayaa ku-siin doonaa warbixinta ku-saabsan cilmibaadhista. Xogtan ayaa kaa caawin doontaa in aad go'aansatid haddii aad doonaysid in aad ka-qaybqaadatid daraasaddan cilmibaadhista.

MAXAA loo-fulinayaa cilmi-baadhistan?

Cilmibaadhayaasha ayaa kuu sheegi doonaa sababta cilmibaadhistan loo-fulinayo. Waxaa kale oo ay kuu sheegi doonaan waxa ay rajaynayaan in ay daraasaddan ka-bartaan.

MAXAA daraasaddan ka dhex dhici doona?

Cilmibaadhayaashu waxay kuu sheegi doonaan:

- Waqtiga ay daraasaddu qaadan doonto
- Haddii aad daraasadda ka-qaybqaadanaysid, waxay kuu sheegi doonaan waxyaalaha aad samayn doontid
- Wakhtiga ay qaadanayaan dhammaan arrimahan oo dhan

Maxay yihiin waxyaalaha xun-xun ee dhici kara?

Cilmibaadhayaasha ayaa kuu sheegi doona waxyaalaha xun-xun ee daraasaddan kala kulmi karaysid haddii aad ka-qaybqaadatid. Waxay kuu sheegi doonaan arrimaha laga yaabo in ay waxyeelo kuu gaystaan, ama ku cabsi gelinaya ama aad ka-yaxyixi kartid. Waxaa kale oo ay kuu sharrixi doonaan sida ay u dhimi karaan saamaynta xun ee waxyaalahan ka iman karta.

Maxay yihiin waxyaalaha WANAAGSAN ee dhici kara?

Cilmibaadhayaashu waxay kuu sheegi doonaan waxyaalaha fiican ee aad la kulmi karaysid haddii aad daraasadda cilmibaadhista ka-qaybqaadatid. Waxaa kale oo ay kuu sheegi doonaan faa'iidooyinka aad ka heli kartid ka-qaybqaadashada daraasadda cimibaadhista. Mararka qaarkood cilmibaadhistu waxay noqonaysaa mid aan adiga waxtar kuu lahayn, balse, caawin karta carruurta mustaqbalka la dawayn doono.

Maxaa dhacaya haddii aanad doonayn in aad daraasadda ka-qaybqaadatid? Maxaa dhacayaa haddii aad damacdid in aad ka-qaybqaadashadaada joojisid?

Ka-qaybqaadashada cilmibaadhistu waa mid ikhtiyaarkaaga ku-xidhan**.** Waad ISKADIIDI KARTAA. Ma-jirayso cid diidmadaa ka-xumaan doonta.

Haddii aad marka hore Oggolaatid, laakiin aad marka dambe ka-noqotid, taasina WAX dhibaato ah malaha. Waxaad xor u tahay in aad cimibaadhista markasta oo aad damacdid aad ka-baxdid. Haddii aad doonaysid in aad cilmibaadhista iskaga baxdid arrintaas cilmaadhaha u sheeg.

Maxaa dhacaya haddii aad doonaysid in aan ka-qaybqaato?

Haddii aad go'aansatid in aad cilmibaadhista ka-qaybqaadatid, waxaad la kulmi doontaa cilmibaadhe. Cilmibaadhahan oo kaashanaya qof luuqaddada ku hadlaya ayaa warbixin kaa siin doona cilmibaadhista. Haddii aad go'aansatid in aad daraasadda ka-qaybqaadatid, cilmibaadhaha u sheeg.

Si aad uga go'aan gaadhid, wakhti kugu filan qaado oo ka-fikir. Su'aal-kasta oo kugu soo dhacda cilmibaadhaha weydii. Wakhti-kasta ayaad su'aal soo jeedin kartaa.

FADLAN WAXAAD OGAATAA: Haddii aad doonaysid in aad daraasadda cilmibaadhista ka-qaybqaadatid, cilmibaadhuhu wuxuu ku siin doonaa foom luqaddaada lagu diyaariyey. Foomkaasi wuxuu kuu sharraxi doonaa daraasadda cilmibaadhista.

Caddaynta Ka-qaybqaataha

Cilmibaadhuhu wuxuu warbixin iga siiyay daraasadda cilmibaadhista. Waxaan haystay fursad aan su'aalo ku soo jeediyo. Waxaan ogahay in aan marwelba su'aalo soo jeedin karo. Waxaan doonayaa in aan daraasadda cilmibaadhista ka-qaybqaato.

Participant's Statement

The researcher told me about the research study. I had a chance to ask questions. I know I can ask questions at any time. I want to be in the research study.

_____

Magaca Ka-qaybqaataha Cilmibaadhista
Name of Research Participant

Fomkani gaaban ee ogolaanshaha ayaa loogu talagaly hal ama ka badan qeeybaha oo dhan,mid kasto wuxuu ka koobnaan doonaa foomka gaaban ee heshiiska,balse gidigood waxeey dhisi doonaan hal iyo foomka gaaban ee Ogolaanshaha oo isku mid ah.

Saxeexa Ka-qaybqaataha Cilmibaadhista **Taariikhda**
Signature of Research Participant **Date**

Magaca Waalidka ama Koriyaha Sharciyaysan
Name of Parent or Legal Guardian

Saxeexa Waalidka ama Koriyaha Sharciyaysan
Signature of Parent or Legal Guardian

Taariikhda **Wakhtiga**
Date **Time**

Xogta Markhaatiga

FADLAN OGOW: Marka la isticmaalayo Foomka Gaaban ee Oggolaanshaha ee oggolaanshaha lagu diiwaan-gelinayo, waxaa loo-baahanyahay magaca iyo saxeexa markhaatiga.

Witness Information

PLEASE NOTE: A witness name and signature is required when using the Short Form Assent to document assent.

Caddaynta Markhaatiga

Waxaan caddaynayaa in aan goob-jooge ka ahaa markii daraasaddan cilmibaadhista afka laga sheegayey.

Witness Statement

I have been present during the oral presentation of this research study.

Magaca Markhaatiga
Name of Witness

Saxeexa Markhaatiga
Signature of Witness

Fomkani gaaban ee ogolaanshaha ayaa loogu talagaly hal ama ka badan qeeybaha oo dhan,mid kasto wuxuu ka koobnaan doonaa foomka gaaban ee heshiiska,balse gidigood waxeey dhisi doonaan hal iyo foomka gaaban ee Ogolaanshaha oo isku mid ah.

Taariikhda **Date**	**Wakhtiga** **Time**

Og: Ka-qaybqaataha Cilmibaadhista ama Waalidka(Waalidiinta) /Koriyaha Sharciyaysan Diiwaanada Caafimaadka **(*Haddii ay sidaasi habboontahay*)**

Copies to: Research Participant or Parent(s)/Legal Guardian
Medical Records **(*if appropriate*)**

Fomkani gaaban ee ogolaanshaha ayaa loogu talagaly hal ama ka badan qeeybaha oo dhan,mid kasto wuxuu ka koobnaan doonaa foomka gaaban ee heshiiska,balse gidigood waxeey dhisi doonaan hal iyo foomka gaaban ee Ogolaanshaha oo isku mid ah.